



Warsidaha Maamulaha Mashruuca Casriyeynta DSR #9

May 2015

Dabaal-degani waa mid bud-dhigidi ah, inkastoo aanu ahayn oo kaliya dugsi cusub oo ku yimid dadaalkeenii dheeraa natijjadii ka soo baxday. Dabaaldegani waa tallaabadii labaad ee socdaalkeenii kaasi oo ilaa maanta ahaa waxaanu qorsheyneynay. Hadda ayaan si dhab ah ugu soo ban baxeynaa bilowgii hawsha.

Haa, waxaan dhiseynaa dhisme laakiin aan ahayn kaliya goobaha la dhisay, maaha oo kaliya lacagta iyo jadwalada. Inta aan ku jirno geedi socodkani, waxaan dejineynaa rajooyinka mustaqbalkeena haddii aynu nahay bulshada dugsigan. Waa in aan abuurnaa rajo wanaagsan oo aan ku gaadheyno in wax kasta oo aan sameynayno maanta iyo wixii ka dambeeya. Waa in aan ku kalsoonaanaa sharafta iyo daacadnimada dadka ka shaqeynaynaya sidoo kale sida aynu inaku u dejiney rajooyin la mid ah ku aynu inagu dajisanay si aan u noqono daris fiican iyo dad wada shaqeeya.

Haddii aan dhammanteen maanta si wada jir ah halkan uga bilowno, marka la fiiriyo dareenka fiican ee kooxda, inakoo u hureyna madaxeena, qalbiyadeena iyo gacmaheena; haddii aan ka wada shaqeyno danteena guud ee aan higsaneyno, inaga oo aan cambaareyneyn faraqa inoo dhexeeyya, laakiinse aqbaleyna faraqyadaasi in ay yihiin fursado kuwa kalena ay u qaataan masuuliyada wax aynaan qaban karin; taasi ka bacdi waxaynu noqon doonaa kuwo guuleysta. Waxa horteena yaalaa waa arrin aan caadi ahayn. Labada sanno ee soo socda waxa aynu la kulmi doonaa wajijo cusub oo aynu saaxiibo ka dhigano, sheekooyinka ay abuuraana wax aynu ka sheekyeyn doonaa sanado fara badan hadda laga bilaabo oo ku saabsan sidii wadajirka ahayd ee aanu u soo wada shaqeynay. Carqalado waa jiri doonaan, waxoogaa dib u dhica ah, iyo guuulo fara badanba. Wuxaan u baahanahay in aan xusno iyadoo mid walbana aan u damaashaadno.

Qof kastoo inaga mid ahi wuxuu leeyahay kaalin uu ka qeybqaato. Qaar waaba ay shaqeynayaa si ay u ilaaliyaan taariikhdeena iyagoo xaqiijinaya sidii aan hore ugu socon lahayn; sidoo kalena aanan u ilaawin waqtigii aan soo marnay. Kuwo waxay ardeyda u qorsheyneyaa sidii ay wax uga baran lahaayeen qeybna ay uga noqon lahayeen nidaamka dhismaha ee socda laftiisa. Qaarkood waxay qorsheynayaan barnaamijyo waxbarasho oo cusub kuwaasi oo fursado siin doono sidii ay ardeydu u raadin lahayd waxa dunida ka suurtagal ah. Iyo iyadoo kuwa fara badani ay qabaneynayaan shaqada ugu muhiimsan, sidii ay ula xidhiidhi lahaayeen ardey kasta iyagoo caawinaya aqoonsanayana waxa uu ku wanaagsan yahay iyo qofnimadooda ku jirta sidaa awgeed oo kale way ka qeybqaadan karaan iyagoo kaalintoodu noqon karto mid fiican. Tanina waxa weeye macnaha inaad noqoto bulsho.

Dhismaha Dugsiga Sare ee Roosevelt waa fursad dhammanteen sidii aan isagu wada iman lahayn ee aan u taageeri lahayn danta inaga wada dhaxeysa. Iyadoo dhammaanteen Aad wada kulmi doono mar labaad bilowga furitaanka dhismaha ugu horeeya ee cusub, waxa ugu muhiimsani wuxuu noqon doonaa miisaanka xoogan ee bulshadani ee intii hawshani socotay la abuuray.

Ilaa iyo wararka xigan kan...

Dhammaantiin waxaan idiinka mahadcelineynaa faalooyinkiinii iyo ka qeybqaadashadii aan aragnay labadii sanno ee aan soo dhaafnay; iyadoo aan rajeyneyno in aan arki doono doono wajiyadii hore iyo kuwo cusuba inta aan ku gudo jirno horumarinta dugsigeena. Xusuusin degdeg ah dukmentiga mashruuca iyo warsiyadayaashii hore oo dhan waxaad ka heli kartaan boggan: <http://RooseveltBond.pps.net>. Sidii caadada ahayd, haddii aad hayso wax su'aalo fadlan waxaad nagala soo xidhiidhaysaa rhsmod@pps.net.

Michelle R. M. Platter

Capital Project Director – Roosevelt High School “Go Riders!”